

Isusocdaalinta-qoyska (Familieinnvandring)

Kiisaskee ayey NOAS qiimeysaa?

NOAS waxay siisaa oo keliya talooyin iyo caawino dhanka sharciyada kiisaska, kuwaasoo

- La-codsadaha (referansepersonen) uu yahay qaxooti Norway ay kasoo qaadatay xeryaha qaxootiyada ee ay maamusho UNHCR, ama uu yahay mid megengelyo ka dalbaday Norway gudaheeda, sidaana ku hellay aqoonsi qaxootinimo ama mid bini'aadinimo
- ama codsadahu (søker) uu ku yahay Norway megengelyo-doone ema ku yahay qaxooti wadan kalle oo aan ahayn Dalkiisii hooyo.

Usoo dirso NOAS kiiskaaga

Hadii aad doonayso in NOAS ay eegto kiiskaaga, waa in aad soo dirtaa waraaqda- ogolaansho-siinta ah oo saxiixan (fullmakt), iyo koobiyada dokumintiyada khuseeya kiiskaaga

Dokumintiyada aad usoo direyso NOAS si loo eego ama loo qiimeeyo kiiskaaga :

- Waraaqda-ogolaansho-siinta (fullmakt) oo leh saxiixa codsadaha(søker) iyo la-codsadaha (referanseperson)
- Koobi ah go'aankii UDI ay ku siisey sharciga la-codsadaha (referansepersonen)(sharci qaxootinimo am amid bini'aadinimo)
- Iyo diidmada laga hellay codsiga isu socdaalinta-qoyska (familieinnvandring)
- Hadii aad hayso dokumentiyo kalle ama warar aad isleedahy waa u mihiim kiiskaaga, waad noo soo diri kartaa.

Waqtiga ay qaadnayso qiimeynta kiiskaaga

Kiiskaaga sida ugu dhaqsiiyaha baddan oo aan wood ugu helno ayaan u fiirin doonaa.

Balse hubanti uma haysanayo in kiiskaaga aynu qaadandoono oo aan wax ka qabanayno.

Talo-siinta ka hor codsashada Isusocdaalinta-qoyska

- NOAS waxay bixin kartaa talooyin hadii aad codsanayso isusocdaalinta-qoyska
- NOAS kaama caawinayso buux buuxinta foomamka codsiga.

Caawino-sharciyeed kadib diidmo

NOAS way qiimeysaa dhamaan kiisaska u yimaada. Waxaan qiime gaara siinaa oo aan ka shaqaynaa kiisaska inoola muuqda in ay haystaan sababo macquula oo wax ka bedeli kara go'aanka diidmada.

Marka aan kiis qiimeyneyno, waxa aan culeyska saarnaa:

- Inta ay le'egtahay caawinada aad ka heshey meelaha kalle.
- In ay jiraan warar cusub oo muhiim u ah kiiskaaga, wararkaasoo UDI ama UNE aysan horey u qiimeyn, sidoo kallena ka dhigi karta jawaabta dawcada mid ka duwan tii horey loogu hellay.

Hadii ay inoola muuqato in aynaan wax ka bedeli karrin diidmadii uu horey u hellay kiiskaagu, waxaan kuu soo diri doonaa fariin arintaa ku saabsan, waana lagu sharixi doonaa sababta.